



Tr: 10/04/202

SUM: MS/XKS/044/2022

Ku: Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka
Og: Guddiga Hirgelinta Doorashooyinka Heer Federal (FEIT)

Ujeedo: Ka soo jawaab celin dacwad maamul

Waxaa xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka lagu wargelinayaa in Maxkamadda Sare dalka ay hor taalo dacwad maamul, dacwadaas oo lidi ku ah **go'aanka Guddiga Hirgelinta Doorashooyinka Heer Federal ay ku hakisay Hop#086**, go'aankan oo sumadiisu tahay **FET/2017/2022** kuna taariikhaysan **06/04/2022**, dacwadan oo sumadeeda **Maxkamadda Sare** tahay, **MS/1/2/2022**, kuna taariikhaysan **09/04/2022**, waxaa dacwadan Maxkamadda Sare hor keenay:-

1. **Fahad Daahir Axmed**, oo uu qareen u yahay Sakariye Ismaaciil Nuur
Lid
2. **Guddiga Hirgelinta Doorashooyinka Heer Federal**, oo uu qareen u yahay Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

Haddaba, waxa ay Maxkamadda sare faraysaa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda in ay kusoo jawaab celiyaan muddo **2 maalin gudaheed ah**, oo ka bilaamaysa **10/04/2022** kuna eeg **12/04/2022**, oo ku beegan maalin talaado ah.

Fiiro gaar ah:- Waxaa halkan ku lifaaqan Arjigii Cabashada qareenada iyo go'aankii ay ka cabanayeen ee ka soo baxay **Guddiga Hirgelinta Doorashooyinka Heer Federal**.

ALLA-MAHAD LEH

Cabdirisaaq Cali Cismaan
Kaaliyaha Sare Ee Maxkamada Sare Dalka.



Address: **Martini Hospital Road, Hamarweyne District Mogadishu - Somalia**
Email: Contact@supremecourt.gov.so, info@supremecourt.gov.so, line 867799

YAFIISKA GARYAQAANKA
GUUD EE DOWLADDA
GALID
Tr: 10/04/2022



Waxay ka qabtay
9/4/2022

Tix: E-Som.17/2022



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

KU: MAXKAMADDA SARE EE DALKA

=Muqdisho=

OG: Guddiga Hirgalinta Doorashooyinka Heer Federaal

=Muqdisho=

Ujeedo: Cabasho lid ku ah go'aanno 06/04/2022, iyo FIET/2017/2022 kuna taariikhaysnaa 17 Febraayo, 2022 ee ka soo baxay Guddiga Hirgalinta Doorashooyinka ee Heer Federaal

Dacwadda ka dhaxaysa

1. Fahad Daahir Axmed, Deggan Degmada Warta Nabadda- Muqdisho, Qareen: Avv. Zakariye Ismaaciil Nuur

=soo-cabte=

LID

2. Guddiga Hirgalinta Doorashooyinka ee Heer Federaal oo uu matalayo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

=Laga-cabte=

ASBAABTA CABASHADA

Asbaabta aan ku durayno go'aanka Guddiga Hirgalinta Doorashooyinka ee Heer Federaal ee soo baxay 06/04/2018, ee uu ku go'aamiyay in in lagu noqdo kuraasta doorasho ee uu ka mid yahay HoP#086 oo ay cabashadeenu ku saabsan tahay iyo go'aan warqadda summadeedu tahay FIET/2017/2022 kuna taariikhaysnaa 17 Febraayo, 2022 kaasoo si sharci darro ah loogu hakiyay qabashada doorashada HoP#086 kaddib markii ay sheegeen in cabashooyin ay ka soo gaareen oday dhaqameedyada iyo mid ka mid ah musharaxiinta.

i. GOGOLDHIG

1. Sida lagu xusay XeerKa Nidaamka Garsoorka Lr. 3 ee soo baxay 1962 gaar ahaan Qodobka 5(3)(b), waxaa Maxkamadda Sare looga caban karaa go'aan kama danbays ah oo ay gaartay hay'ad maamul.
 2. Guddiga Hirgalinta Doorashooyinka ee Heer Federaal, Guddiga Maamulka Doorashooyinka ee Heer Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Guddiga Xallinta Khilaafaadka ee Doorashooyinka intuba waxaa loo aqoonsanayaa inay yihiin hay'ado maamuul iyadoo la tixgalinayo Sharciga Jihaynta Doorashooyinka 2020/2021 Lr. 30, ee uu ansixiyay Baarlamaanka Soomaaliye 26 Septembar 2020 uuna saxiixay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya 11kii Oktoobar 2021.
 3. Waxaa lagu faahfaahiyay dhismaha, waajibaadka iyo habka go'aan qaadashada Guddiyada kala duwan Habraaca Hirgalinta Doorashooyinka ee 1, Oktoobar, 2020.
 4. Habraaca wuxuu xusayaa in dhamaan go'aamada Guddiga Hirgalinta Doorashooyinka ee Heer Federaal lagu qaato cod hal dheeri ah 50 % +1.
- ii. Cabashada waxay ku salaysan tahay in go'aanku yahay Sharci darro:**
5. Guddiga Hirgalinta Doorashooyinka ee Heer Federaal waxay baraha bulshada ku qoreen 17/02/2021, war aan lahayn faahfaahin iyo sababo lagu hakiyo doorashada kursi HoP#86 oo qabashadiisa la shaaciyay, looma marin habraaca go'aan qaadashadooda oo ah hab cod hal dheeri ah 50 % +1.
 6. Guddiga Maamulka Doorashada Heer Dawlad-goboleed Hirshabelle iyo dhammaan wakiilada Guddiyada Heer Federal iyo Xalinta Khilaafaadka waxay go'aan ku taariikhaysan 18/02/2022 summadiisuna tahay GMDHDX/HSS/0014/2022, ku xuseen inay baraha bulshada ku arkeen warqad been abuur ah oo aan lahayn faahfaahin iyo sabab lagu hakin karo kursi doorashadiisa la shaaciyay taasoo xusaysa in la hakiyo HoP#86.
 7. Guddiga Maamulka Doorashada Heer Dawlad-goboleed Hirshabelle wuxuu xaqiijiyay in la maray dhammaan habraaca sharci ee lagu heshiiyay, wuxuuna xusay inaanay ka jirin wax cabasho kursigaa. Waxay caddeeyeen inaanay jirin sabab loo hakiyo kursigaa oo odoyaasha dhaqanka ee soo xulaya ergada odaygii saxiixaha ka ahaa doorashada 2016.

8. Guddiga Guddiga Maamulka Doorashada Heer Dawlad-goboleed Hirshabelle, waxay si sharci ah u qabteen doorashada kursiga HoP#086, waxaana 20/02/2022, ku guulaystay muwakilkeenna Fahad Daahir Axmed.
9. Guddiga Hirgalinta Doorashooyinka Heer Federaal warkooda ugu danbeeyay ee ay ku sheegeen inay ku go'aamiyeen in doorashada kuraasta uu ka mid yahay kursiga HoP#86, waa warsaxaafadeed aan lahayn sumad iyo saxiix toona, mana waafaqsana habka go'aan qaadashada Gudiga ee hab cod hal dheeri ah 50 % +1 (ultra vires (acting beyond their power)).
10. Dhinaca kale waxay si waafaqsan habraaca go'aan gaarista Guddiga Hirgalinta Doorashooyinka Heer Federaal ee hab cod hal dheeri ah 50 % +1 ku go'aamiyeen go'aanka ku taariikhaysan Abriil 4, 2022, summaddiisuna tahay TXR/GHDHF/04/0056/22, kaddib shirkoodii ay ku yeesheen Muqdisho inay fasaxeen kuraas uu ka mid yahay kursiga HoP#086 guulaystay muwakilkeenna Fahad Daahir Axmed.
11. Sida ku xusan Nidaamka Habraaca Hirgalinta Doorashooyinka ee 1, Oktoobar, 2020, waxaa xallinta khilaafaadka iyo ka go'aan gaarista cabashooyinka awood loo siiyay Guddiga Xallinta Khilaafaadka ee Doorashooyinka.
12. Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashooyinka wuxuu go'aan ku taariikhaysan 23/02/2022, summaddisuna tahay Ref:GXKHDD25/2022 in la fasaxay kuraas la doortay oo uu ku jiro kursiga HoP#086 oo ku guulaystay Fahad Daahir Axmed. Guddigu wuxuu tixraacay warbixinta ay la wadaageen xubnaha Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashooyinka ee Dawlad-goboleedka Hirshabelle.
13. Guddiga Xallinta Khilaafaadka Doorashooyinka wuxuu go'aanka ku caddeeyay inaanay jirin cabasho rasmi ah oo la diiwaangaliyay mudada ku qoran habraacyada. Gabagabana wuxuu xusay in la fasaxay kuraastaa si ay u qaataan shahaadada rasmiga ah.
14. Sida ku xusan Nidaamka Habraaca Hirgalinta Doorashooyinka ee 1, Oktoobar, 2020, waxaa awoodda maamulka doorashada la siiyay Guddiga Maamulka Doorashada Heer Dawlad-goboleed, Guddiga Hirgalinta Doorashooyinka Heer Federaalna inay bixiyaan shahaadada.
15. Beegsiga Guddiga Hirgalinta Doorashooyinka Heer Federaal ee sida gaarka ah kursiga HoP#86 oo si sharci ah doorashadiisu u dhacday si aan waafaqsanayn habraaca ay ku

go'aan gaaraan, wuxuu ka dhigan yahay si xun u isticmaal awoodeed (abuse of power).

16. Waxaa kaloo laga dheehan karaa in guddigu aanay ka madaxbannaanayn xakameyn siyaasadeed markuu ku jiro gudashada hawlihiisa. Sidoo kale guddigu/ama shakhsiyaadka hogaamiya waxay ku guul darreystay/teen inuu hannaanka doorashooyinka loo hago si dhexdhexaadnimo, dimuqraadiyad, daah furnaan iyo hufnaan leh.
17. Beegsiga muwaadinkaa wuxuu ka hor-imanayaa xuquuqda muwaadinka ee lagu xaqiijiyay Dastuurka ku-meel-gaarka ah 2012.

iii. **GEBO-GEBO IYO CODSI**

Haddaba, waxaan Maxkamadda Sare ee Dalka ee sharafta mudan ka codsanaynaa:

1. In ay jabiso go'aannada ku kalataariikhaysan 06/04/2022 iyo FIET/2017/2022 kuna taariikhaysnaa 17 Febraayo, 2022 ee ka soo baxay Guddiga Hirgalinta Doorashooyinka ee Heer Federaal, sidoo kale go'aamiso in ay yihiin waxba kama jiraan (nul and void).
2. In ay go'aamiso in Fahad Daahir Axmed uu si sharci ah ugu guulaystay korsiga HoP#086, habraaca loomarana uu ahaa mid sax ah oo sharciga waafaqsan, sida ay sheegeen guddiga khilaafaadka heer federal iyo Guddiga Hirgelinta Doorashada ee Dowlad-goboleedka Horshabeelle.
3. In ay Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka ku ammarto in uu diiwaangeliyo Fahad Daahir Axmed, si uu xubin uga noqdo Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Mahadsanidiin

Avv. Zakariye I. Nuur

